

Kindy ee

Queensland

Waa maxay kindy?

Kindergarten, ee loo yaqaanno Kindy, waa barnaamij waxbarasho oo wakhtiga badhkii ah looguna talagalay carruurta sanadka dugsiga ka horeeya. Aadida barnaamijka Kindy waxa ay u oggolaanaysaa ilmahaaga in uu wax ku barto ciyaarta, saaxiibo samaysto uuna u diyaar garoobo u wareegida dugsiga.

Barnaamijyada Kindy ee ay ansixisay Queensland Government waxa ay ku salaysan yihiin ciyaar waxana bixiya macalin khibrad u leh oo carruurnimada hore ah. Barnaamijyada Kindy waxa lagu bixin karaa xarumaha waxbarashada carruurnimada hore; qaar ka mid ah dugsiyada tuulooyinka ee fog; ama waxbarashada masaafada ama eKindy ee carruurta qaarkood kuwaasi oo aan heli karin xarun.

Wax ku barashada kindy

kindy, carruurta waxa ay ku barayaan ciyaarta si ay:

- U isticmaalaan luuqadda si ay u xidhiidhiyaan fikradaha iyo dareennada
- U samaystaan asxaab, ay la wadaagaan ayna la ciyaaraan kuwa kale
- Ay wax ku bartaan waayo-aragnimo cusub
- Ay noqdaan kuwo aad iskugu kalsoon ayna dareemaan awood
- Ay ku muujiyaan naftooda farshaxan, qoob ka ciyaar iyo ciyaaro xiiso leh
- Ay dhisaan aqoontooda, shaaca ka qaadaan fikrado cusub ayna ka caawiyaan in ay ku raaxaystaan bilawga dugsiga.

Sida la isku diiwaangeliyo

Queensland, carruurta waxa ay aadi karaan Kindy sanadka dugsiga ka horeeya. Adeeg kastaa waa mid midka kale ka duwan qaarkoodna waxa ay lahaan karaan liiska sugida, sidaa daraadeed waa fikrad fiican in aad kala hadasho doorashadaada adeega kindergarten ee aad dooratay wakhtiga ugu habboon ee ilmahaaga aad diiwaangelin karto.

Ilmahaagu waa in uu noqdaa 4 sano jir 30 ka Juun si uu uga qaybqaato Kindy.

Dhalashada ilmaha	Ilmuhu waxa uu tagi karaa kindy
1 Luulyo 2013 ilaa 30 Juun 2014	2018
1 Luulyo 2014 ilaa 30 Juun 2015	2019
1 Luulyo 2015 ilaa 30 Juun 2016	2020
1 Luulyo 2016 ilaa 30 Juun 2017	2021
1 Luulyo 2017 ilaa 30 Juun 2018	2022
1 Luulyo 2018 ilaa 30 Juun 2019	2023

Waxa aad u baahan doonta si aad u qorto ilmahaaga:

- magaca iyo ciwaanka ilmaha
- macluumaadka sida waalidiintooda, ilaalayaha ama wakiilka
- macluumaadka amarro kasta oo maxkamadeed ama amarrada waalidka ama qorshayaasha
- macluumaadka shuruudo kasta oo gaar ah (sida. Naafanimada, xasaasiyada cuntada ama baahiyo kale)
- caddaynta taariikhda dhalashada (sida shahaaddada dhalashada)
- xaaladda caafimaadka iyo tallaalka
- macluumaadka dadka loo oggol yahay in ay ilmahaaga qaadaan iyo cidda la ogaysiinayo xaaladaha degdegga ah.

Adeeggaadu waxa uu ka dhigi doonaa macluumaadkan mid qarsoodi ah waxa aanad galangal buuxa u yeelan doontaa diiwaannada ilmahaaga.



Doorashada barnaamijka kindy

Dhammaan carruurta Queensland waxa ay xaq u leeyihiin in ay aadaan xanaano la ansixiyay ka hor dugsiga.

Barnaamijka kindergarten ee la ansixiyay waxa uu waafaqsan yahay tilmaameyaasha dawlada, waxana weey:

- barnaamij waxbarasho oo ku salaysan ciyaar waxana bixinaya macalimiin takhasus u leh carruurnimada hore, iyada oo la raacayo tilmaameyaasha dawlada
- caadi ahaan waxa la bixiyaa 15 saacadood toddobaadki, 40 toddobaad sanadkii, carruurta sanadka ka horeeya dugsiga
- iyadoo la kaashanayo Queensland Kindergarten Learning Guideline ama barnaamij waxbarasho oo kale oo ay aqoonsan yihiin Queensland Curriculum and Assessment Authority .

si lagaaga caawiyo in aad ogaato barnaamijka ay ansixisay Queensland Government, waxaad eegtaa 'kindy tick'.



Waa maxay kharashka kindy

Lacagta dugsiga xannaanadu waa ay kala duwan tahay iyada oo ku xidhan adeegga. La xidhiidh Kindy gaaga aad doorbiday si aad uga hesho faahfaahin ku saabsan qaabka lacagtiisa.

Kindergarten ka lacagta jaban ama bilaashka ah waxa la siiyaa qoysaska xaqa u leh, ayna ku jiraan qoysaska xanaanada, kuwaasi oo:

- haysta Health Care Card ee hadda ee Dawlada Ustareeliya (HCC) (ama haysta ilmo leh)
- haysta Australian Government Pensioner Concession Card ee hadda (xaq u lahaanshaha awtamaatiga ah ee HCC)
- haysta Department of Veterans' Affairs Gold Card ama White Card
- haysta wada xidhiidh rasmi ah, sida waraaq, ka timiday wakaaladii ku haboonayd sheegaysana ujeeddada loo bixinayo HCC.
- ay yihiin dadka asalka ah (aborigines) ama Torres Strait Islander (ama haysta ilme kaasi oo ah)
- haysta saddex ama ka badan oo carruur ah, iskuna da' ah , lana qoray sanad isku mid ah.

Kabitaanka kharashka yar ama bilaashka ah ee kindergarten waxa si toosa loo siinaya bixiyaha adeegaaga. Waxa ay yarayn karaan kharashaadkaaga jeebka ka baxsan. Waxa la qaadan karaa mar kaliya, xataa haddii aad buuxiso shuruudo kala duwan.

Qoysaska carruurtoodu ka qaybqaadanayaan barnaamijka kindergarten maalin dheer sidoo kale waxa ay xaq u yeelan karaan Commonwealth Government Child Care Subsidy.

Macluumaadka ku saabsan xaq u lahaanshaha kaabayaashan Dawladaha Barwaaqo Sooranka waxa laga heli karaa Centrelink.

Carruurta xannaanada ku jirta ama ama daryeelka qaraabonimada sidoo kale waxa ay galangal u yeelan karaan kaabayaal dheeri ah. La xidhiidh Kindy dabadeedna Child Safety Service Centre si aad u hesho macluumaad dheeri ah.

Macluumaad dheeri ah

La xidhiidh Queensland Government taleefonka **13 74 68**
Raadi 'kindy' www.qld.gov.au/earlyyearscount

